**Taariikhaha dhaqan galka ayaa kala duwan, laga billaabo Luuliyo 1, 2020**

Shaqada Office of Labor Standards (OLS, Xafiiska Heerarka Shaqaalaha) waa in la hormariyo heerarka shaqaalaha ayadoo la adeegsanaayo wada shaqayn waxtar ah oo lala yeesho bulshada iyo ganacsiyada, hormarinta xeer xoojin iyo hal abuur leh, ayadoo muhiimada la siinaayo sinaanta bulshada iyo isirka.

Boorka waa in lagu dhajiyaa meelo loo jeedo oo goobta shaqada kamid ah, asagoo ku qoran af Ingiriis iyo luuqadaha ay ku hadlaan shaqaaluhu. Office of Labor Standards (OLS, Xafiiska Heerarka Shaqaalaha) wuxuu siiyaa adeegyada turjumaada iyo fasiraada luuqada iyo caawimaado dadka naafada ah.

# 2025 Ogaysiiska Xaquuqaha Shaqaalaha Ganacsiyada Adeegyada hudheelka Bixiya

## Sharcigaan Ma Ku quseeyaa?

**WAA MAXAY "GANACSIGA ADEEGYADA SIIYA HUDHEELKA" (AHB)?**

Ganacsiga ayaa ah AHB haddii uu leeyahay mid kamid ah noocyadaan xariirada oo kala dhaxeeya hudheel:

1. Ganacsigu uu si joogto ah heshiis ula galo hudheel si uu adeegyo u siiyo martida
2. Ganacsigu uu boos ka kiraysto hudheelka si uu adeegyo u siiyo martida, ama
3. Ganacsigu uu albaab ku dhex leeyahay hudheelka uuna cuntooyin iyo cabitaano siiyo martida hudheelka iyo dadwaynaha

Adeegyada la bixiyo waxaa ku jira kuwa lala baxsho adeegyada hudheelka ee muddada kooban ee dadka hudheelka dagan, kuwaasoo ay ku jiraan cunto ama cabitaan, adeegyada nasiinada, qolalka shirarka iyo hoolalka kullanada, qaybta dhar dhaqaalka, iyo baakinka.

Wixii xog dheeraad ah oo ku aadan in ganacsiga aad u shaqayso uu yahay AHB iyo in kale, fadlan booqo webseetka Office of Labor Standards (Xafiiska Xeerarka Shaqaalaha).

## Helitaanka daryeelka Caafimaadka

**WUXUU KA DOONAYAA LOO SHAQEEYAASHA INAY BAXSHAAN QARASHAADKA DARYEELKA CAAFIMAADKA**

**SHARCIGAAN YUU QUSEEYAA?**

Shaqaalaha saacada ku shaqeeya ee (1) u shaqeeya ganacsi AHB ah oo ay u shaqeeyaan 50 shaqaale ah ama ka badan oo ganacsi la sameeya hudheel leh 100 qolalka martida ah ama kasii badan, iyo (2) shaqeeya celceliska 80 saacadood ama ka badan bil kasta. Ma quseeyo kormeerayaasha, maamulayaasha, ama shaqaale gaar ah kuwaasoo gacan ka gaysta go'aaminta xeerarka maaraynta ee la xariira xariirada shaqada.

**SHAQAALUHU WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:**

- Inay helaan daryeel caafimaad oo hormarsan ayna ku helaan qarashaadka daryeelka caafimaadka ee laga doonaayo shirkada ay u shaqeeyaan
- Shirkadaha loo shaqeeyo ayaa qarashka ku bixin kara mid ama labo kamid ah qaababka soo socda:
  (1) lacagaha dakhliga caadiga ah
  (2) lacagaha lagu bixiyo qorshaha caymiska caafimaadka ee shirkada loo shaqeeyo bixiso,
  iyo/ama
  (3) lacagaha lagu bixiyo caymisyada caafimaadka ee canshuurta laga jaro (tusaale, koontooyinka kaydka caafimaadka)

**2025 QIIMAYAASHA†**

| Qarashka Bilaha ah | Xubnaha Qoyska |
|---|---|
| $561 | Shaqaale Kaligiis ah |
| $955 | Shaqaale kaligiis ah oo dad masruufa |
| $1,124 | Shaqaalaha leh lamaanaha/xaaska, aana ahayn mid qof ku tiirsan |
| $1,686 | Shaqaalaha leh lamaanaha/xaaska iyo dad uu masruufo |

†Qiimayaasha sanad kasta ayaa lagu dhawaqaa ugu danbayn Juun 30 keeda sanadka hore

## Kahortaga Rabshada

**WUXUU KA DIFAACAA SHAQAALAHA RABSHADA AMA AMA FALALKA DHIBAATAYNTA AH EE AY GAYSTAAN DADKA MARTIDA AH**

**SHARCIGAAN YUU QUSEEYAA?**

Shaqaalaha saacada ku shaqeeya ee ganacsiga AHB oo la shaqeeya hudheel leh 60 qol ama ka badan oo kuwa martida ah

**SHAQAALUHU WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:**

- Inay helaan batoonada cabsida (oo hudheelku bixiyo) markay ka shaqaynayaan ama ay adeeg u gaynayaan qol hudheelka uu ka dagan yahay qof marti ah
- Inay usoo sheegaan rabshad ama dhibaatayn uu gaysanaayo qof marti ah qofka aad u shaqayso
- In lagaa difaaco rabshada ama dhibaatada ay gaystaan martida hudheelku
- Inaan loo dhiibin shaqo ama inay adeegyo u geeyaan qolka martida ee hudheelka haddii la cadeeyay in qofka martida ah ee qolkaas joogo uu dhibaato u gaysanaayo

**HADDII SHAQAALUHU YAHAY MID KA BADBAADAY RABSHAD AMA DHIBAATO U GAYSTAY QOF MARTI AH, WUXUU XAQ U LEEYAHAY:**

- In loo diro aag kale oo shaqo oo uu doorto
- Inuu helo waqti uu mushaar ku qaadanaayo oo uu la hadlaayo laamaha sharciga iyo qof taageero siiya oo shaqaaluhu dooranaayo
- Inuu helo King County Sexual Assault Resource Center (Xarunta Khayraadka Caawimaada Weerarka Galmada ee Degmada King) si uu helo adeegyada taageerada, iyo/ama u gudbinta adeegyada kale WAC (Laynka 24 saac shaqeeya): 1-888-998-6423
- Inuu helo u doodaha dhibanaha fal danbiyeedka sida ku cad Xeerka Wax laga Badelay ee Washington 7.69.030

## Joogtaynta Shaqada

**WUXUU QASAB KA DHIGAYAA IN SHAQAALUHU AYSAN SHAQADA DHUMIN KADIB MARKA MULKIILAHA GANACSIGU ISBADELO**

**SHARCIGAAN YUU QUSEEYAA?**

Shaqaalaha saacada ku shaqeeya ee (1) u shaqeeya ganacsi AHB ah oo ay u shaqeeyaan 50 shaqaale ah ama ka badan oo ganacsi la sameeya hudheel leh 60 qolalka martida ah ama kasii badan, iyo (2) u shaqeeyay ganacsiga AHB ugu yaraan 30 maalmood kahor intaan la iibin ganacsiga AHB. Ma quseeyo kormeerayaasha, maamulayaasha, ama shaqaale gaar ah kuwaasoo gacan ka gaysta go'aaminta xeerarka maaraynta ee la xariira xariirada shaqada.

**SHAQAALUHU WAXAY XAQ U LEEYIHIIN:**

- In la ogaysiiyo in mulkiyada ganacsiga la badelaayo
- Siinta boos shaqo oo qoraal ah oo uu bixiyo mulkiilaha cusub (boos shaqo oo ku salaysan sida shaqaaluhu u kala sareeyaan)
- Sagaashan maalmood oo ay lasii shaqeeyaan mulkiilaha cusub, ilaa inay jirto maahee sabab sax ah oo shaqaalaha loo cayrsho ama ay jirto baahi la xariirta in shaqaalaha shaqada laga saaro (shaqo ka cayrin ku dhisan sida shaqaaluhu u kala sareeyaan)
- Qiimaynta dadaalka shaqada 90 maalmood kadib

Ka fiiri webseetka wixii faahfaahin ah oo la xariirta taariikhaha sharci kasta.

## Baro Xaquuqdaada Shaqaalaha

**AARGOOSIGU WAA MAMNUUC.** Sharciyadaan waxay ka difaacayaan shaqaalaha aargoosi ku aadan inay raadsadeen ama ku dhaqmeen xaquuqdooda sharci.

**XAQA GUDBINTA CABASHADA:** Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay cabasho u gudbiyaan OLS ama dacwad sharci ah gudbiyaan haddii qofka ay u shaqeenayaan jabiyo sharciyadaan.

**Cidda lala xariiraayo:**
**OFFICE OF LABOR STANDARDS**

**Loo shaqeeyaasha**
Hel caawimaada ku dhaqanka sharciga iyo/ama gal tababar

**Shaqaalaha**
U gudbi cabasho xafiiska OLS ama dacwad u gudbi maxkamada

**206-256-5297**
**www.seattle.gov/laborstandards**

810 THIRD AVE, SUITE 375 SEATTLE, WA 98104 | LABORSTANDARDS@SEATTLE.GOV